HSE Social Inclusion

# Ilmahaaga dhowaan dhashay ka tallaal Fayraska Xira Marin-haweedka neefsashada (RSV)



# Waa maxay RSV?

**RSV waa fayras badanaa lala kulmo oo sababa qufac iyo hargab. Wuxu badanaa faafaa xilliyada jiilaalkii iyo guga qaybtiisa hore. RSV wuxu jirro halis ah ku keeni karaa carruurta aad u yaryar, khaasatan sebiyada ka yar saddex bilood jir.**

## Waa maxay sababta aan ilmahayga uga tallaalayo fayraska RSV?

Jiilaalka kasta waddanka Ireland, kala bar sebiyada dhasha waxay qaadaan fayraska RSV. Afar ka mid ah boqolkii ilmood ee dhasha ayaa isbitaal loo dhigaa fayraska RSV dartiis, iyadoo ilmahaas qaarkood ay u baahdaan daawayn khaas ah oo ay ku qaataan qaybaha daryeelka xaaladaha halista ah ee isbitaalka.

**Ma jirto daawo khaas ah oo lagu daweeyo RSV. Tallaalku waa habka ugu fiican ee aad ilmahaaga kaga ilaalin karto RSV.**

## Sidee baan ilmahayga uga ilaalin karaa RSV?

Tallaal la yidhaahdo nirsevimab ayaa hadda lagu taliyaa in sebiyada la siiyo. Wuxu ilmahaaga ka ilaalinayaa inuu jirro halis ah kala kulmo caabuqa RSV muddada lagu jiro bilaha jiilaalka.

Tallaalka Nirsevimab waa hal cirbad oo lagu durayo bowdada ilmahaaga. Waa bilaa lacag. Ilmahaaga waxa tallaalkan la siin doonaa ka hor inta aadan ka bixin isbitaalka hooyada iyo dhallaanka.

Jaanjada RSV wuxu u shaqeeya si ka duwan tallaalada kale. Tallaaladu waxay cariyaan ama kiciyaan nidaamka difaaca jirka si uu u sameysto waxyaabo (antibodhiyo) ay kula dagaalamaan caabuqa. Nirsevimab wuxu bixiyaa antibodhiyo (waxyaabaha difaaca jirka) diyaarsan oo ilaalin doona ilmahaaga.

## Waa maxay faa'iidada ku jirta inaan ilmahayga ka ilaaliyo fayraska RSV?

Nirsevimab wuxu ilmahaaga ka badbaadin doonaa fayraska RSV ugu yaraan shanta bilood ee jiilaalka muddadaas heerka fayraska RSV ee bulshada dhexdoodu ugu sarreeyo.

Sebiyada qaatay tallaalka nirsevimab 80% uma baahdaan in isibitaal loo dhigo RSV darteed, in la dhigo qaybta xaaladaha khatarta ahee isbitaalka, oo inta badan mana yeeshaan cillado ka dhashay RSV. Tallaalku islamarka la qaatoba wuu hawlgalaa, sidaas daraadeed ilmahaagu wuu ilaashan yahay islamarka uu ka baxayo isbitaalka.

## Nirsevimab ilmahayga badbaado ma u leeyahay?

Haa, dhammaan daraasadaha la sameeyay waxay muujinayaan in tallaalka nirsevimab aamin yahay.

## Waa maxay saamaynaha xun ee nirsevimab keeni karo?

Ma jiraan saameyno xun oo badanaa lala kulmo. Wax ka yar 1 ilmo 100-kii sebi ee qaata tallaalka nirsevimab ayaa laga yaabaa inay yeeshaan:

- Meesha ilmaha cirbadda lagaga duray oo casaata ama guduudata
- Qandho sahlan ama dhexdhexaad ah
- Finan sahlan

Ilmahaaga si joogto ah ayaa loola socon doonaa ka dib marka la tallaalo.

Tallaalka nirsevimab kuma jiro fayraska RSV oo ma keeni karo xanuun la xidhiidha fayraska RSV. Dhakhtarkaaga ama umulusidaada ayaa kaaga jawaabi doona wixii su'aalo ah ee aad qabto.

## Ma jiraan wax kale oo aan sameyn karo si aan ilmahayga uga ilaaliyo fayraska RSV?

Nirsevimab waa habka keli ah ee aad ilmahaaga kaga ilaalin karto caabuqa khatarta ah ee RSV. Waxaad khatarta ilmahaagu ku qaadi karo RSV ama xanuunada kale ee hargabka iyo qufaca ku yarayn kartaa adigoo:

- Gacmaha ku nadiifiya biyo iyo saabuun ama jeermis dilaha gacmaha ee alkahoolka ka sameysan
- Iska ilaaliya tegista goobaha lagu buuqsan yahay ama dadku ku badan yahay
- Yareeynta ama iska ilaalinta la kulanka dadka qaba qufaca iyo hargabka, iyo caabuqyada kale.

## Yaan qaadan karayn tallaalka nirsevimab?

Umulisooyinka ama dhakhatarkaaga ayaa kuu sheegi doona haddii ay aaminsan yihiin in aanay ilmahaaga u roonayn inuu qaato nirsevimab. Waa in ilmahaagu caafimaad qabo marka la siinayo tallaalka nirsevimab. Haddii ilmahaaga xaaladiisa caafimaad lala socdo oo laga fiirinayo wax dhibaatooyin ah sida cilladaha dhiiga, caabuq, neefsashada oo ku adag, ama sonkorta dhiigooda oo hooseysa, tallaalka nirsevimab dib ayaa loo dhigi karaa illaa inta ilmuhu caafimaadayo.

# Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Umulisooyinka iyo dhakhtarkaaga ayaa kaala hadli doona wax kasta oo tallaalka nirsevimab ku saabsan iyaga ayaana kaaga jawaabi doona su'aal kasta oo aad qabto. Haddii aad go'aansato inaad ilmahaaga ka tallaasho fayraska RSV, waxa lagaa dalban doonaa inaad ogolaansho afka ah (idan) bixiso si ilmahaaga cirbadda tallaalka loo siiyo.

Wixii macluumaad dheeraada ah ee ka socda HSE ka fiiri
**www.hse.ie/RSV**

Si aad u fiiriso xogta bukaanka ee Hay'adda Daawooyinka Yurub booqo:
**www.ema.europa.eu/en/medicines/human/EPAR/beyfortus**

Taariikhda:
Lambarka Qaybta: